STATSMINISTERENS KONTOR

# War-saxaafadeed

Lr.: 57/21

Taariikh: 5. mai 2021

## Xeer beddelis ku saabsan shahaadada koroonaha oo loo gudbiyay dhegaysi guud

**Dawladdu waxa ay rabtaa in ay isticmaasho shahaadada koroonaha si loo kordhiyo furidda qaybaha bulshada isla markaana ay suurtaggal u noqoto in bulshadu furnaato inta ka dhimman cudurkan safmarka ah. Haddii la rabo in meelo badan loo isticmaalo shahaadada koroonaha waxa muuqata in loo baahan yahay sharci loo cuskado. Dawladdu waxa ay taas darteed maanta dhegaysi guud u gudbinaysaa soo jeedin xeer oo ku saabsan isticmaalka shahaadada koroonaha.**

Shahaadada koroonuhu waxa ay si la hubo u caddayn doontaa magacaaga iyo taariikhda dhalashada, in lagu tallaalay, in lagaa waayey cudurka iyo in aad difaacan tahay kaddib markii uu koroonahu kugu dhacay.

– Shahaado noocaas ah waxa loo isticmaali karaa in la balaadhiyo dib u furidda bulshadeena lana dedejiyo dib u furidda. Taas darteed waxannu ka shaqaynaynaa diyaarinta shahaado koroona oo lagu kalsoonaan karo. Mar kasta oo la sii kordhiyo faa’idooyinka qofku ka helayo shahaadada koroonaha ee noocaas ah, waxa muhiim sii noqonaya in laga doodo sharciga loo cuskanayo arrintaas. Waxannu ku rajo qabnaa in aannu wadashaqayn fiican la yeelanno Stortinget si go’aan degdeg ah looga soo saaro kiiskan, ayay tidhi raysalwasaare Erna Solberg.

Dawladdu hadda ma hayso liis dhammaystiran oo ka kooban waxyaalaha loo isticmaali karo shahaadada koroonada.

– Waannu raacsan nahay talooyinka aannu ka helnay hay’addaha u xil-saaran caafimaadka ee ku saabsan in shahaadada koroonaha loo isticmaali karo qabanqaabooyinka guud ee waaweyn, safarrada maraakiibta dalxiiska (*cruise*) iyo safarrada abaabulan ee shirkad laga iibsanayo gaadiid iyo jiif wada socda (*pakkereiser*). Laakiin dawladdu waxay leedahay hadaf ku saabsan in waxyaallo intaas ka sii weyn loo isticmaalo shahaadada. Waxannu tusaale

Postadresse
P.B. 8001 DEP
0030 OSLO

Regjeringen.no
Twitter
Facebook
Flickr

Kommunikasjonsseksjonen
Telefon: 22 24 40 07

Besøksadresse
Glacisgata 1
OSLO

statssekretær
Rune Alstadsæter
Kontor: 22 24 48 40
Mobil: 91 55 84 19

kommunikasjonssjef
Anne Kristin Hjukse
Kontor: 22 24 40 72
Mobil: 99 21 46 10

ahaan eegi doonnaa in shahaadada lagu isticmaali karo degmooyinka ay xeerarkoodu ka adag yihiin kuwa heerka qaran ah. Waxa jira su'aallo badan oo u baahan in xal loo helo ka hor intaan go'aan la gaadhin, ayay tidhi raysalwasaaruhu.

**Nooc ku meel gaadh ah ayaa diyaar ah**
Noocii koowaad ee shahaadada koroonaha ee Norway waa diyaar hadda. Waxa kan lagu ogaan karaa natiijada tijaabada koroonaha iyo in lagaa tallaalay koroonaha. Xogtaas waxaa aad ku arki kartaa barnaamijka (app) Helsenorge ee lagu soo dejisto telefoonka ama Helsenorge.no, halkaas oo aad xataa kala soo bixi kartid caddaynta oo pdf ah.

– Lama xaqiijin karo xogta ku jirta noocan ku meel gaadhka ah. Markaa waxa dhici karta in dadku samaystaan shahaadooyin been ah. Taas darteed hadda lama balaadhin karo isticmaalka noocan shaahadada, ayuu sharraxay Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

**Nidaam lagu kalsoonaan karo**
Hay'addaha caafimaadka ayaa ka sii shaqayn doona diyaarinta nooc shahaado koroona oo xogteeda la xaqiijin karo. Waxa qorshaysan in noocaasi diyaar noqdo qaybaha hore ee bisha juun, waxaanu noqon doonaa mid ku habboon ku isticmaalka waddanka gudahiisa. Nooca rasmiga ah, oo la qorsheeyay in uu diyaar noqdo dhammaadka bisha juun, waxa uu noqon doonaa mid buuxinaya dhammaan shuruudaha Midowga Yurub.

– Waxa uu ahaan doonaa mid xataa la isticmaali karo marka la tegayo waddamo kale, haddii shuruud laga dhigo in qofku tallaallan yahay, ama laga waayey cudurka ama koroonahu hore ugu dhacay si uu waddanka u geli karo ama looga dhaafi karo xeerarka safarrada khuseeya sida karantiilka oo kale, ayuu yidhi Høie.

Qaybta ku saabsan safarradu waxa ay ka mid tahay shaqada uu wado Midowga Yurub ee ku saabsan in shahaadada koroonaha loo sameeyo nidaam guud oo ka dhexeeya Yurub.

– Marka dib loo furo xuduudaha, waa in aynu leenahay nidaam lagu kalsoon yahay – oo dadku khiyaamayn karin oo aan suurtaggal ka dhigayn in la soo bandhigo caddaymo been ah oo sheegaya in tallaal la qaatay, ayuu hoosta ka xarriiqay Høie.

**Qabanqaabooyinka dibedda**
Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa ay diyaariyeen qorshe hordhac ah oo ku saabsan tirada dadka ka qaybgeli kara qabanqaabooyinka guud ee dibedda lagu qabanayo xilliga xagaaga. Qorshahani waxa uu waafaqsan yahay qorshaha dib u furidda bulshada ee dawladda, waxaanu heer kasta kordhinayaa tirada dadka meel isugu iman karta.

Dawladdu waxa ay aaminsan tahay in shahaadada koroonaha iyo tijaabo koroona oo qofka lagaga qaadayo albaabku ay noqon karaan wax la isticmaali karo marka qabanqaabooyin waaweyn oo dibedda ah la qabanayo xilliga xagaaga.

– Waa muhiim in la ogaado in qorshahani rasmi ahayn. Marka koowaad, waxa dhici karta in cillado ku yimaadaan hawsha diyaarinta shahaadada. Marka labaad, waxa jira su'aallo badan oo u baahan in jawaab loo helo ka hor intaan la isticmaalin shahaadada. Marka saddexaad, waa in aynu ka faa'idaysano waayo-aragnimada laga helo heerarka hore ka hor intaan loo gudbin ka xiga. Guud ahaan waxa jira waxyaallo badan oo aan la hubin, ayay tidhi raysalwasaare Erna Solberg.

Kuwani waa soo jeedinta ku saabsan tirada dadka ka qaybgeli kara qabanqaabooyinka dibedda ah marka la marayo heerarka qorshaha dib u furidda ee kala ah 2, 3 iyo 4. Waxa dhici karta in wax laga beddelo tirada guud iyo tirada ay kooxaha joogtada ah ka koobnaan karaan, iyadoo lagu salayn doono xaaladda faafidda cudurka iyo waayo-aragnimada laga helay heerarka 2 iyo 3. Habsocodka dib u furidda bulshada waxa weli lagu salayn doonaa xogta la hayo, ee ma lagu salayn doono taariikho la sii sheegayo.

**Aan lahayn boosas fadhi oo joogto ah, loona tilmaamayo qofka (maanta waa 200):**

| | **Aan isticmaalayn tijaabo-qaadis ama shahaado** | **Isticmaalaya tijaabo-qaadis ama shahaado** |
|---|---|---|
| **Heerka 2** | 200 | 2 x 200 |
| **Heerka 3** | 4 x 200 | Ugu badnaan 50 % inta meeshu qaaddo, ugu badnaan 2000 oo u qaybsan kooxo joogto ah oo midkiiba yahay ugu badnaan 500 |
| **Heerka 4** | 1500 | Ugu badnaan 75 % inta meeshu qaaddo, laakiin ma dhaafi karto 5000 |

**Leh boosas fadhi oo joogto ah, loona tilmaamayo qofka (maanta waa 3 x 200):**

| | **Aan isticmaalayn tijaabo-qaadis ama shahaado** | **Isticmaalaya tijaabo-qaadis ama shahaado** |
|---|---|---|
| **Heerka 2** | 3 x 200 | 5 x 200 |
| **Heerka 3** | 4 x 500 | Ugu badnaan 50 % inta meeshu qaaddo, ugu badnaan 5000 oo u qaybsan kooxo joogto ah oo midkiiba yahay ugu badnaan 500 |
| **Heerka 4** | 5000 | Ugu badnaan 75 % inta meeshu qaaddo, laakiin ma dhaafi karto 10 000 |